

	<b>OGOW XUQUUQAHAGA GOOBTA SHAQADA:</b>
	Ka hadalka Mushaharkaaga
	Sida uu dhigayo Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka, waxaad xaq u leedahay inaad kala hadasho mushaharkaaga saaxibadaada shaqo, warbaahinta, urur shaqaale mise xarun shaqaale, hay'ad dawladeed, mise dadwaynaha.
	Waxaad xaq u leedahay inaad ku biirto saaxibadaada shaqo si aad u raadsato mushahar sare mise aad uga cabato sinnaan la'aanta mushahar— oo ay ku jiraan aaladaha warbaahinta bulshada.
	Waa sharci darro in shaqo bixiyaha uu si uun kaaga aarguto howshan darteed—sida in lagugu sameeyo hawlo shaqo oo aad u adag, qoraal, xannibid, mise ku ceyriyo.
	Ma sharci darro in shaqo bixiyehaag leeyahay siyaasad kaa mamnuucaysa inaad hawshan gasho, si uu kuugu sheego inaadan gali karin hawshan, mise ku waydiyo inaad saxeexo inaad ka tanaasusho xuquuqahaaga.
	Guddiga Xiriirka Shaqaallaha Qaranka waa wakaalad fadaraal madax bannaan oo ilaalisu xuquuqaha shaqaalaha ganacsiga gaarka ah si aysi wadajir ah ugu biiraan urur mise urur la'aan, si loo hagaajiyo mushaharkooda iyo xaaladahooda shaqo.